


1. 15 daqiqo ka hor ballantaada la muddeeyay ee caafimaad ee isgaarsiinta la adeegsado, guji linkiga iimeylka ama farriinta qoraalka ah laguugu soo diray.

- Linkigan waxa isticmaali kara hal qof oo kaliya si uu ugu biiro ballanta. Haddii qof labaad uu rabo inuu kaga biiro aalad kale, adeeg-bixiyaha ayaa martiqaadi kara qofka marka ay ballantu bilaabanto.




<https://patient.testing.visitnow.org/a/7gothVK> You have been sent the following Children's Mercy KidCare Anywhere invitation which will allow you to attend an online session with your Provider. // Se le envió la siguiente invitación de Children's Mercy KidCare Anywhere que le permitirá asistir a una sesión en línea con su Proveedor.


THIS LINK CAN ONLY BE USED BY ONE USER/PARENT and should not be shared.

Se le envió la siguiente invitación de Children's Mercy KidCare Anywhere que le permitirá asistir a una sesión en línea con su Proveedor en el departamento de Beacon. Esta visita es para Monica el Monday, March 1, 2021 09:00 am CST.


2. Haddii aad isticmaalayo koombiyuutar, laabtob, ama taleefan Android ah, waxa lagu gayn doonaa mareegta KidCare Anywhere si aad u xaadirto ballantaada caafimaad ee isgaarsiinta la adeegsado. Guji Check-In.



Haddii aad isticmaalayso iPhone ama iPad si aad ugu xiranto booqashadaada, waxa lagaa codsan doonaa inaad soo dejisato app-ka KidCare Anywhere. Haddii aad hore u soo dejisatay app-ka KidCare Anywhere, app-ku waa uu furmi doonaa.



Guji
Download
Badhanka app-ka



Guji GET ee ku taala app store-ka si aad ula soo degto app-ka Children's Mercy KidCare Anywhere




Kadib marka aad app-ka soo dejisatid, ku laabo fariintaada qoraalka ah ama iimeylkaaga oo guji linkiga ballanta.

App-ku waa inuu si otomaatig ah u furmo oo uu ku geeyo bogga isxaadirinta. Guji Check-In.



3. Fiiri macluumaadka ilmahaaga oo guji Confirm.

4. Haddii aad isticmaalayso koombiyuutar, laabtob ama taleefan Android ah, waxaad arki doontaa shaashadda hoose. Waxaad ku tijaabin kartaa internetkaaga, mikirifoonkaaga, iyo kameeradaada shaashaddan.



- Guji fallaaraaha hoos u baxda si aad u furto liiska si aad u doorato kameera ama mikirifoon kale.
- Guji Proceed markii aad dhammayso ee aad diyaar u tahay inaad gasho qolka sugitaanka.



- Haddii aad isticmaalayo iPhone ama iPad, waxaad arki doontaa shaashadda hoose. Guji Test Connection si aad u tijaabiso internetkaaga, mikirifoonkaaga, iyo kameeradaada.
- Guji OK si aad ugu oggolaato KidCare Anywhere inuu isticmaalo mikirifoonka iyo kameerada aaladdaada.
- Guji Done marka tijaabadu dhammaato si aad ugu laabato qolka sugitaanka.



5. Waxa lagu gayn qolka sugitaanka ee onlaynka ah. Adeeg-bixiyaha ayaa kuugu soo biiri doona si onlayn ah marka ay gaarto wakhtiga ballantaadu. Ha LAABIN ama ha ka bixin shaashaddan ama app-ka ilaa ay booqashadaadu dhammaato.
6. Haddii aad aragto farriin (pop-up) oo ay kaa codsato inaad isticmaasho kameeradaada iyo mikirifoonkaaga, guji Allow.



TILMAAMAH A WAKHTIGA WICITAANKU SOCDO

- Tani waa sida shaashaddaadu u ekaanayso marka ballantaada caafimaad ee isgaarsiinta la isticmaalayo ay bilaabanto ee adeeg-bixiyuhuna uu xiriirsan yahay.



- Hubi in kameeradaada iyo mikirifoonkaagu ay daaran yihiin. Guji astaanta si aad u daarto ama u damiso.

◊ Kani waa sida astaamuhu u ekaan doonaan marka ay daaran yihiin.



◊ Kani waa sida astaamuhu u ekaan doonaan marka ay dansan yihiin.




- Haddii mikirifoonkaaga iyo kameeradaadu ay daaran yihiin laakiin aysan shaqeynayn markaad isticmaalayso koombiyutarka, isku day inaad kameerada ama mikirifoonka beddesho.


1. Guji astaanta Settings.




2. Marka aad Settings joogto, guji fallaarahaa hoose si aad u furto liiska una doorato kameera ama mikirifoon kale. Guji Close marka aad dhammayso.



- Si aad farriin ugu dirto adeeg-bixiyaha adigoo isticmaalaya wada-sheekaysiga onlaynka ah inta ay ballantaadu socoto, guji astaanta Chat si aad u furto wada-sheekaysiga. Qor farriintaada oo guji Send.



- Si aad u soo afjarto ballantaada, guji astaanta End Call.



- Guji End.

Do you want to end the call?

CANCEL END

- Haddii aad soo afjarto wicitaanka kahor inta aanad dhammaysan, waxaad gujin kartaa linkiga iimeylkaaga ama farriinta qoraalka ah waxaanad isxaadirin kartaa mar kale. Tani waxay ku siin kartaa ikhtiyaarka ah inaad dib xiriirka u soo gasho 5 daqiiqo gudahood kadib markii aad xiriirka jartay.